

Ogeysiis loogu talaggalay waalidiinta 24.3.2020

Ogeysiis ku saabsan bixinta lacagta macmiilka barbaarinta hore iyo dammaanadda booska daryeelka inta lagu guda jiro xukunka degdegga ah

Waalidiinta carruurtoodu ay dhigtaan barbaarinta hore ee sharafta lahoow!

Xarumaha hawlaha barbaarinta hore (ilmaha aan wali da'da iskuulka gaarin) iyo waxbarashada hore (esiopetus) ee halkaas ka socdaba wali waa la sii wadayaa oo halkoodii ayay ka sii soconayaan. Dawladda Finland waxaa ay soo jeedisay talada ah, in waalidiinta ay suurtaggalka u tahay in ay carruurtooda guryaha ku daryeelaan, ay sidaas yeelaan. Haddii aad awooddo in aad carruurtaada guriga ku daryeesho ha keenin goobta barbaarinta hore. Sidaas ayaan ku yarayn karnaa faafitaanka cudurka Koroona-ha.

Wasaaradda waxbarashada iyo dhaqanka waxaa ay soo jeedinaysaa, xaaladda xukunka degdegga ah ee dawladdu soo saartay awgeed, in iyadoo la cuskanaayo sharciga laga dejiyay bixinta lacagta macmiilka barbaarinta hore ee tirsigiisu yahay (1503/2016) 13 §:, in magaalooyinku aysan wax lacagta macmiilka ah ka qaadin waalidiinta, haddii uu waalidku carruurtiisa isagu guriga ku daryeelaayo.

Go'aanka ay gaartay duqa magaalada Vantaa Ritva Viljanen 24.3.2020

- 1) Inta lagugu gudo jiro xukunka degdegga ah ee ay dawladdu amartay, xilliyada ay carruurto ka maqan yihiin barbaarinta hore, dib ayaa loo soo gudayaa wixii kharash ahaa ee laga qaaday. Magdhabidda kharashkaas waa mid aan ku xirnayn sababta uu ilmuhu u maqan yahay. Lacagtaas waxaa si dib ahaan ah loo soo gudi doonaa laga bilaabo 18.3.20 .
Waalidka waxaa laga codsanayaa in ay sidii caadiga ahayd goobta barbaarinta hore ugu soo sheegaan maqnaanshaha ilmaha dhanka telefoonka, iimeylka ama farriinta telefoonka.
Magdhabidda kharashka waxaa ay khusaysaa barbaarinta hore ee ay magaaladu bixiso iyo tan ah nidaamka adeegga la soo iibsaday (palveluseteli).
- 2) Shuruudaha dammaanadda goobta daryeelka waxbaa laga beddelayaa inta lagu guda jiro xukunka degdegga ah. Dammaanadda goobta daryeelka waxaa ay dammaanad ahaan u sii jiri kartaa ugu yaraan muddo hal bil ah laga soo bilaabo 18.3.2020. Arrinka ku saabsan dammaanaddaas waxaa heshiis lagala yeelan karaa madaxa xannaanada. Qoraalka heshiiskaasna waxaa uu ku qoran yahay oo laga helayaa bogga internetka ee magaalada Vantaa. Dammaanadda goobta daryeelka waxaa ay khusaysaa goobaha barbaarinta hore ee magaalada.

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ke heli kartaan bogga vantaa.fi, madaxa xannaanada ee goobta barbaarinta hore iyo agaasimaha barbaarinta hore Kati Timo, etunimi.sukunimi@vantaa.fi.

Mahadsanidin

Sole Askola-Vehviläinen
Madaxa barbaarinta hore